

1

Akhri buug-yarahaaga codbixiyeyaasha si aad u barrato waxa ku qoran warqaddaada codbixinta.



2

Warqaddaada codbixinta, buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhyadaada.




3

Saxiix xagga dambe ee bakhshadda soo celinta ee warqaddaada codbixinta.



4

Soo celi warqaddaada codbixinta. Haddii ay tahay sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama boostada, wakhti hore codee!



5

Raad-raac warqaddaada codbixinta. Booqo kce.wiki/TrackMyBallot-SO ama isku qor helitaanka digniimaha warqadda codbixinta barta kce.wiki/BallotAlert. Kuwani waa hababka ugu wanaagsan ee lagu ogaado in warqaddaada codbixinta la tiriyay oo codkaaga la maqlay.



Sida loo

codeeyo!

Doorashada Gaarka ah ee Febraayo 2026

Degmada King Buug-yaraha Rasmiga ah ee Codbixiyeyaasha Deegaanka

sida ay codsatay Degmada Dugsiga Bellevue Lr. 405

Isku qor si aad u hesho digniimaha warqadda codbixinta!

Hel qoraallo taleefan ama iimeelyo ah marka warqaddaada codbixinta la sii habeynaayo oo la tiriyo. Iska qor barta kce.wiki/TrackMyBallot-SO.



Is diiwaan geli si aad u codeyso



Oonleenka: Booqo VoteWA.gov si aad oonleenka iskaga diiwaan geliso oo aad u codeyso. Wakhtiga kama dambeysta ah ee is diiwaan gelinta oonleenka ee Doorashada Gaarka ah ee Febraayo waa Febraayo 2.



Boostada: Ka soo degso oo daabaco foomka diiwaan gelinta barta kce.wiki/VoterReg oo boostada ugu dir Doorashooyinka Degmada King: 919 SW Grady Way, Renton, WA 98057. Waa in la helaa ugu dambeyn Febraayo 2.



Shakhsi ahaan: Waxaad shakhsi ahaan iskaga diiwaan gelin kartaa xarunta guud ee Doorashooyinka Degmada King ilaa iyo Febraayo 10, Maalinta Doorashada. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan saacadaha iyo adeegyada waxaad ka heli kartaa barta kingcounty.gov/elections.

Nala soo xiriir si aad u hesho buug-yarahaan oo qaab kale ah.

Contact us to receive your voting materials in Chinese, Korean, Russian, Somali, Spanish, or Vietnamese.

如需獲取您的中文投票資訊，請與我們聯絡。

한국어로 투표 자료를 받으시려면 저희에게 연락하세요.

Свяжитесь с нами, чтобы получать материалы для голосования на русском.


Nala soo xiriir si aad u hesho agabyadaada codeynta oo ku qoran Af-Soomaali.

Comuníquese con nosotros para recibir sus materiales de votación en español.

Xin vui lòng liên lạc với Sở Bầu cử Quận King để nhận tài liệu bầu cử bằng tiếng Việt.



Baro wax dheeraad ah oo ku saabsan sanduuqyada lagu rido, Xarumaha Codbixinta, iyo in ka badan!



Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah?

Haddii warqaddaada codbixinta ay dhunto ama xumaato, waxaad daabacan kartaa warqad codbixin beddelaad ah adigoo jooga guriga, maktabadda, ama meel walba oo ku habboon.

Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka (OBMP) waxaa heli kara dhammaan codbixiyeyaasha diiwaan gashan. Waxaa loogu talagalay inuu u oggolaado codbixiyeyaasha naafada ah, gaar ahaan kuwa indhooleyaasha ah ama uu araggoodu hooseeyo, inay warqaddooda codbixinta si gaar ah u calaamadayaan.



Sida loo isticmaalo Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka

- Tag barta kingcounty.gov/elections/obmp.
- Macluumaadkaaga geli foomka.
- Ku calaamadee dookhyadaada warqadda codbixinta oonleenka oo ka dibna daabac warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay.
- Hubi in warqaddaada codbixinta si sax ah aad u calaamadaysay.
- Ku soo celi warqaddaada codbixinta sida caadiga ah, sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama adoo soo marsiinaaya boostada.

AMA

- Daabac warqaddaada codbixinta oo ka dibna gacanta ku calaamadee.

Lacagta boostada looma baahna haddii aad isticmaasho xaashida lifaaqa bakhshadda ee la socota marka aad daabacaysno warqaddaada codbixinta.



Haddii aad u baahan tahay caawinnaad dheeraad ah ama hab kale oo aad u dhiibato warqaddaada codbixinta, fadlan kala soo xiriir xafiiskeena taleefanka 206-296-VOTE (8683).




Yaa deeq ku bixiya ololeyaasha?

Eeg ku-deeqeyaasha dhaqaale ee musharaxiinta iyo cabbirrada sharciga ee gobolka iyo dowladda hoose:

Guddiga Kashifaadda Dadweynaha

www.pdc.wa.gov | Wicitaanka Lacag La'aanta 1-877-601-2828



Waxaan halkaan u joogaa in aan ku caawinno!

Shaqaalaha doorashooyinka ayaa kaa caawinno kara inaad is diiwaan geliso oo aad hesho warqad codbixin cusub ilaa iyo Maalinta Doorashada. Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah oo ma doonaysaa inaad si gaar ah u calaamadaysno warqaddaada codbixinta? Ka hel warqaddaada codbixinta oonleenka barta kingcounty.gov/elections/obmp si aad uga faa'iidayso Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka.

Warqaddaada codbixinta ayaa waxaa ku duuban macluumaad waxtar leh! Iska xaqiiji inaad lifaaqa warqaddaada codbixinta ka dhex eegto:

- shanta sanduuq ee lagu rido warqadda codbixinta ee kuugu dhow,
- halka aad ka heli karto caawinnaad shakhsi ahaanneed,
- sida loo daabacdo warqaddaada codbixinta haddii taada kaa lunto ama waxyeello soo gaarto,
- sida loo soo celiyo warqaddaada codbixinta,
- iyo in ka badan!

206-296-VOTE (8683)
elections@kingcounty.gov
kingcounty.gov/elections

Baraheena Bulshada
[@kcelections](https://www.kingcounty.gov/elections)



Degmada Dugsiga Bellevue Lr. 405

Soo Jeedinta Lr. 1		
Dib-U-Cusbooneysiinta Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada		
Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Bellevue Lr. 405 ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 2025-14, ee khuseeya soo jeedin si loo joogteeyo maalgelinta waxbarashada ee hadda jirta. Soo jeedintaan waxay maalgelin doontaa hawlgallada, oo ay ku jiraan barnaamijyada CTE, shaqaalaha fasalka, la-taliyeyaasha, kalkaaliyeyaasha caafimaadka, caafimaadka maskaxda, ammaanka/amniga, waxbarashada horumarsan, barnaamijyada STEM, adeegyada waxbarashada gaarka ah, muusigga, farshaxanka iyo hawlaha manhajka ka baxsan, iyo u oggolaanaysaa Degmada inay soo rogto canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda, taasoo dib-u-cusbooneysiinaysa canshuur wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada:		
Sannadka Ururinta	Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/\$1,000 Qiimaha la qiimeeyay	Caddadka Canshuurta
2027	\$0.75	\$88,300,000
2028	\$0.75	\$93,200,000
2029	\$0.75	\$97,900,000
2030	\$0.75	\$103,000,000
dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 2025-14. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?		
Haa		
Maya		
	Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))	

Bayaanka lagu taageerayo

Lynne Robinson, My-Linh Thai, Tim Motts
www.BellevueQualitySchools.org

Dugsiyadeena tayada leh waa sharafta bulshadeenna. Ku codeynta *"Haa"* ee Soo Jeedinta 1 waxay cusbooneysiinaysaa ballaqaadkeenna waxbarasho ee tayada leh.

Degmada Dugsiga Bellevue waxay gaartaa qaar ka mid ah natiijooyinka waxbarasho ee ugu wanaagsan gobolka, mahadnaqa macallimiinteenna tayada leh, waalidiinta iyo qoysaska ka qayb qaata, iyo taageero ballaaran oo bulsho. Soo jeedinta 1 waxay xoojinaysaa tiirarka iyada oo la maalgelinayo: *Waxbarasho Tayo Sare* leh oo leh Waxbarasho Xirfadeed iyo Farsamo (CTE); Sayniska, Teknolojiyada, Injineerinka, iyo Xisaabta (STEM); luqadaha adduunka, iyo barnaamijyada waxbarashada horumarsan; *Fayoqabka Ardayda* oo ay weheliyaan kalkaaliyeyaasha caafimaadka, la-taliyeyaasha, iyo shaqaalaha ammaanka; *Barnaamijyada Ardayda ee uusan Gobolku Maalgelin* oo ay ku jiraan barnaamijyo sida farshaxanka iyo muusikada; ciyaaraha dheeraadka ah ee dugsiga dibaddiisa iyo fursadaha dugsiga ka diib; *Waxyaabaha Muhiimka ah ee Waxbarashada* Sida agabka waxbarashada fasalka, gaadiidka, iyo dhab ahaantii in kulayliyaha iyo nalalka la dhigo kuwo shidnaada.

Xaqiiqdu waxay tahay in Gobolka uusan si buuxda u maalgelin baahiyahaan aasaasiga ah, waxaana la filayaa in degmooyinka dugsiga maxalliga ah ay daboolaan iyada oo loo marayo canshuuraha maxalliga ah. Dib-u-cusbooneysiinta canshuurtaan waxay sii wadi doontaa maalgelinta baahiyaha aasaasiga ah ee waxbarashada ay ardaydeennu ku tiirsan yihiin. Ma aha *Canshuur Cusub* waxayna si fudud u cusbooneysiinaysaa canshuurta jirta iyadoo la raacayo heerka canshuurta hadda jira.

Ardaydeennu way guuleystaan iyadoo ay mahadnaq leedahay taageerada bulshadeenna. *Hadda way isku keen halaynayaan si aan ugu codeyno "Haa" oo aan dib-u-cusbooneysiino Soo Jeedinta 1 si ardaydu u guulaystaan!*

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Tirooyinka ay soo bandhigeen guddiga ka soo horjeedidda dugsiyada ma saxna, lacagaha canshuurahaan looma isticmaalo bixinta mushaharka maamuleyaasha. Ku codeynta *"Haa"* waxay ilaalinaysaa heerka isku midka ah ee degan oo ay codbixiyeyaashu hore u ansixiyeen. Labada canshuur ee jira waxay ka dhigan yihiin 24% maalgelinta dugsiyada sannadka 2024–2025. Haddii canshuurtu fashilanto, waxay keenni doontaa jarjarro waaweyn oo ku yimaada barnaamijyada muhiimka ah ee ardayda iyo taageerada. Bulshadeenna way ku mahadsan yihiin taageerada, Bellevue SD waxay gaartay qaar ka mid ah natiijooyinka waxbarasho ee ugu sareeya gobolka. Ku codee *"Haa"* si loo gaaro guusha ardayda!

Doorashooyinka Degmada King looma oggola inay wax ka beddelaan bayaannada, mana qaadaan mas’uuliyadda qoraallada ku jira.

Bayaanka Sharaxaadda

Ansixinta Soo Jeedinta 1 waxay dib-u-cusbooneysiin doontaa canshuurta barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada ee hadda jirta taasoo wakhtigeedu dhammaanayso dhammaadka sannadka kalandarka ee 2026. Canshuurta waxay bixisaa hawlgallada dugsiga ee aan Gobolka maalgelin, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn: Barnaamijyada iyo xarumaha Waxbarashada Xirfadda iyo Farsamada ("CTE"); shaqaale dheeraad ah oo fasalka ah; fasallada xiisadda toddobaad iyo casharo caawinnaad ee dugsiyada dhexe iyo sare; luqadaha adduunka ee dugsiyada dhexe, hiddaha iyo barnaamijyada labada luqadood; la-taliyeyaasha, cilmu-nafsiga iyo kalkaaliyeyaasha caafimaadka, iyo shaqaalaha bulshada; barashada shucuurta bulshada; shaqaalaha nabadgelyada iyo amniga, tababarka iyo qorsheynta xaaladaha degdegga ah; barashada horumarsan ee dhammaan heerarka fasalka; sayniska, farsamada, injineernimada iyo xisaabta ("STEM") barnaamijyada; fasallo horumarsan (ay ku jiraan Meelaynta Sare (Advanced Placement), Baccalaureate International iyo Kulliyadda Dugsiga Sare), adeegyada waxbarashada gaarka ah; orkestara, kooxda muusigga iyo muusigga; ciyaaraha isboortiska iyo hawlaha dugsiga ka dib ee ardayda; fanka iyo muusigga dugsiga hoose; kharashka gaadiidka; agabyada, sahayda iyo adeegyada tamarta iyo kharashyada kale ee aan hantida waaweyn ahayn ee maamulidda Degmada.

Haddii la ansixiyo, Soo Jeedinta 1 waxay oggolaanaysaa soo rogitaan canshuur hanti oo dhan \$88,300,000 sannadka 2027, \$93,200,000 sannadka 2028, \$97,900,000 sannadka 2029, iyo \$103,000,000 sannadka 2030. Iyadoo lagu salaynayo macluumaadka qiimeynta ee la saadaaliyay, heerka canshuurta ee loo baahan yahay si loo soo saaro caddadyadaan waxaa lagu qiyaasay inuu yahay \$0.75 halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay. Heerarka saxda ah ee canshuurta iyo caddadka la ururin doono waxaa laga yaabaa in la isku hagaajiyo iyadoo lagu salaynayo qiimaha la qiimeeyay ee dhabta ah ee hantida gudaha Degmada iyo xaddidaadyada uu soo rogay sharciga Gobolka wakhtiga canshuurta la soo rogayo. Ka dhaaftaanka canshuuraha ayaa laga yaabaa inay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha; wac Qiimeeyaha Degmada King 206-296-3920.

Bayaanka looga soo horjeedo

Kendall Demaree
commentsbsdlevyopposition@gmail.com

Canshuurta Horumarinta ee 4 sanno ah waa kordhin 43% oo doolar ah marka loo eego Canshuurta Horumarinta ee 4 sanno ee hore. Ma aha "dib-u-cusbooneysiin." Canshuurtaan waxay ahayd in loogu yeero Canshuurta Horumarinta – barnaamijyada horumarinta ardayda – ma aha kororka mushaharka shaqaalaha. Sannadka 2024-2025, waxaa jiray 26 degmo dugsiyeed oo WA ah, Bellevue waa mid ka mid ah, kuwaas oo siiyeen kormeerahooda guud mushahar ka badan \$400,000. Taasi waa mushahar ka badan tan Guddoomiyaha gobolka. Go'aanka McCleary wuxuu ku baaqay in la helo maalgelin siman oo ku filan dhammaan degmooyinka dugsiyada WA iyada oo loo marayo habka maalgelinta Gobolka. Dugsiyada Charter-ka ee dadweynaha ee WA waxay raacaan miisaaniyaddooda. Dugsiyada Charter-ku ma awoodaan (sharci ahaan) inay codsadaan maalgelin dheeraad ah iyagoo maraya canshuurahaan joogtada ah ee degmooyinka dugsiyada deegaanka. Degmooyinka dugsiyada dadweynaha ee caadiga ah waa inay raacaan isla xeerarkaas.

Sannadka dugsiyeedka 2024-2025, degmadu horrey u lahayd Wadarta Kharashka Ardayga qiyaastii \$27,000. Anaga codbixiyeyaasha, waa inaan qaadano go'aan mabda' leh oo aan diidno kharashkaan dheeraadka ah. Laga bilaabo 2025, qiyaastii 60% canshuuraha hantideena ayaa aada maalgelinta K-12. Tani waxay ka dhigaysaa lahaanshaha guryaha iyo kirada inay sii adkaato in la helo taasoo dhaawacaysa mustaqbalka carruurteena. (Kiraysteyaasha waxay bixiyaan canshuurtu hantida ee kiradooda dhexdeeda ah.)

Si aad u hesho falanqeyn kharash macquul ah oo sax ah, booqo webseedka SchoolDataProject.com.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Bayaanka taageeridda wuxuu ku doodayaa in canshuurta loo baahan yahay si loo daboolo arrimo uu McCleary horrey uga hadlay. Sida laga soo xigtay bayaanka taageeridda ee Soo jeedinta 1: “dhab ahaantii in kulayliyaha iyo nalalka la sii shido.”

Ama gobolku si weyn ayuu oo ka hooseysa meeshii la rabay u maalgelinayaa baahiyaha aasaasiga ah ee ardayda sida uu sharciga gobolku farayo, ama in lacagaha ay si khaldan u maamusho BSD, ama labadaba. Ama waxaa suurtagal ah in bayaanka “taageeridda” uu yahay buunbuunin mala-awaal ah oo shucuur ku dhisan oo ku saabsan canshuurta. Runtii, ma waxaad leedahay canshuur la'aanteed nalalku way damayaan?

Degmada Dugsiga Bellevue Lr. 405

Soo Jeedinta Lr. 2		
Dib-U-Cusbooneysiinta Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Mashaariicda Teknolojiyada iyo Hantida Waaweyn		
Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Bellevue Lr. 405 ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 2025-15, ee khuseeya soo jeedin si loo joogteeyo maalgelinta mashaariicda teknolojiyada waxbarashada iyo hantida waaweyn. Soo jeedintaan waxay maalgelin doontaa xarumaha waxbarashada, oo ay ku jiraan teknolojiyado cusub oo ay hellaan ardayda, waxbarashada STEM ee wadajir ah iyo manhaj isku dhafan oo dhijitaal ah, kaabayaasha shabakadda/amniga internetka, saqafyada, HVAC iyo nidaamyada ammaanka/amniga, iyo u oggolaanaysaa Degmada inay soo rogto canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda, taasoo dib-u-cusbooneysiinaysa canshuur wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada:		
Sannadka Ururinta	Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/\$1,000 Qiimaha la qiimeeyay	Caddadka Canshuurta
2027	\$0.54	\$64,000,000
2028	\$0.54	\$67,000,000
2029	\$0.54	\$70,000,000
2030	\$0.54	\$73,000,000
dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 2025-15. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?		
Haa		
Maya		
	Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))	

Bayaanka lagu taageerayo

Lynne Robinson, My-Linh Thai, Tim Motts
www.BellevueQualitySchools.org

Ardaydeennu waxay mudan yihiin dugsiga ammaan ah, caafimaad qaba, oo casri ah. Ku Codee *"Haa"* si dib loogu cusbooneysiyo Canshuurta Mashaariicda Teknolojiyada iyo Hantida Waaweyn oo sii wad u diyaarinta ardayda guulaha mustaqbalka.

Waxbarashada casriga ah iyo u diyaar garoowga shaqo waxay u baahan tahay maalgelinta teknolojiyadeed si ay fasalladayadu u sii wadaan baahiyaha waxbarashada STEM ee isbeddelaya oo lagu daray hababka waxbarashada caadiga ah. Canshuurtaan waxay maalgelisaa beddelka qalabka duuga ah in *arday kasta* uu helo fursad waxbarasho oo kombuyuutar ama tablet casri ah. Sidoo kale waxay taageertaa waxbarashada fasalka iyada oo loo marayo tababarka macallimiinta ee deegaanka si degdeg ah u beddelaaya jawiga teknolojiyada.

Soo jeedinta 2 sidoo kale waxay maalgelisaa baahiyaha aasaasiga ah ee mashaariicda hantida waaweyn ee Gobolku uusan daboolin si loo ilaaliyo deegaan waxbarasho oo ammaan ah oo caafimaad qaba oo loogu talagalay ardaydeenna. Canshuurtaan ayaa dhismeyaasha dugsiyadeena ku joogteysaa xaalad wanaagsan iyada oo lagu sameeyo dayactirka saqafka iyo cusbooneysiinta nidaamyada HVAC (kulaylisada, qaboojinta, iyo hawo-socodka); horumarinta waxtarka tamarta si loo taageero deegaanka taasoo badbaadisa lacagta canshuur-bixiyeyaasha iyadoo loo marayo kharashka adeegga tamarta oo hooseeya; iyo garoomada ciyaaraha, jikada dugsiyada, iyo casriyaynta ammaanka iskuul kasta oo degmada ku yaal.

Tani ma aha Canshuur Cusub. Sida Soo jeedinta 1 oo kale, codbixiyeyaasha waxaa la weydiiyaa 4 sanno kasta inay si fudud u cusbooneysiyaan canshuuraha ay hore u ansixiyeen. Ku codeynta *"Haa"* waxay joogteynaysaa heer canshuur degan iyadoo sii wadaysa maalgelinta mashaariicda hantida waaweyn iyo teknolojiyada ay ardaydeennu u baahan yihiin si ay ugu guuleystaan.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Bayaanka Sharaxaadda Degmada ee kor ku xusan wuxuu ka kooban yahay dhammaan wadarta lacagaha loo adeegsaday xisaabinta. Codbixiyeyaashu waxay filayaan heerar canshuureed oo degan, cabbirkanina wuxuu si fudud u cusbooneysiinayaa canshuurta hadda jirta si dugsiyadeenu ula socdaan kharashyada sii kordhaaya iyada oo aan la wiiqin waxbarashada tayada leh. Guddiga ka soo horjeedidda dugsiyada wax dood ah kama soo bandhigin mashaariicda ay canshuurtaan maalgeliso—taasna waa sabab wanaagsan! Canshuurtaan waxay bixisaa aasaas adag si ardaydeennu diiradda ugu saaraan barashada.

Doorashooyinka Degmada King looma oggola inay wax ka beddelaan bayaannada, mana qaadaan mas’uuliyadda qoraallada ku jira.

Bayaanka Sharaxaadda

Ansixinta Soo Jeedinta 2 waxay dib-u-cusbooneysiin doontaa canshuurta mashaariicda teknolojiyada iyo hantida waaweyn ee hadda jirta taasoo wakhtigeedu dhammaanayso dhammaadka sannadka kalandarka ee 2026. Canshuurtu waxay bixisaa teknolojiyada waxbarashada, xarumaha dugsiga, iyo hagaajinta kaabayaasha ee aanu Gobolku maalgelin, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn: (1) teknolojiyada degmada oo dhan si ay ardayda u siiso helitaanka teknolojiyada cusub iyo softiweerka taageera waxbarashada, wada shaqeynta waxbarashada STEM, manhaj dhigitaal ah oo isku dhafan, iyo kombuyuutarro iyo/ama taabletyoo arday kasta; (2) teknolojiyada fasalka iyo nidaamyada la xiriira, oo ay ku jiraan teknolojiyada waxbaridda iyo barashada, taageerada teknolojiyada, kaabayaasha shabakadda iyo amniga internetka, iyo tababarka teknolojiyada shaqaalaha; iyo (3) casriyaynta xarumaha dugsiga, oo ay ku jiraan saqafyada ballaaran, iyo hababka kulaylinta iyo qaboojinta iyo qalabka (“HVAC”) hagaajinta, dayactirka hantida waaweyn, hagaajinta xarunta ciyaaraha, hababka ammaanka iyo amniga iyo hagaajinnada kaabayaasha, hagaajinnada xarunta jikada, iyo ilaalinta tamarta.

Haddii la ansixiyo, Soo Jeedinta 2 waxay oggolaanaysaa canshuur ilaa iyo \$64,000,000 ah sannadka 2027, \$67,000,000 sannadka 2028, \$70,000,000 sannadka 2029, iyo \$73,000,000 sannadka 2030. Iyadoo lagu salaynayo macluumaadka qiimeynta la qiimeeyay ee la saadaaliyay, heerka canshuurta ee loo baahan yahay si loo soo saaro caddadyadaan waxaa lagu qiyaasay inuu yahay \$0.54 halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay. Heerka saxda ah ee canshuurta ayaa laga yaabaa in la isku hagaajiyo iyadoo lagu salaynayo qiimaha dhabta ah ee la qiimeeyay ee hantida gudaha Degmada wakhtiga canshuurta la soo rogayo. Ka dhaaftaanka canshuuraha ayaa laga yaabaa inay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha; wac Qiimeeyaha Degmada King 206-296-3920.

Bayaanka looga soo horjeedo

Kendall Demaree
commentsbsdlevyopposition@gmail.com

Canshuurtaan Hantida Waaweyn ee 4-ta sanno ah waa kordhin 20% oo doolar ahaan oo ka sareysa Canshuurtii Hantida Waaweyn ee hore ee afarta ee sanno la soo dhaafay.

Bellevue SD ma aha inay ku muujiyaan, agabyadooda ololaha, in codbixiyeyaashu u codeynayaan heerarka canshuuraha mustaqbalka. Anaga, codbixiyeyaasha, waxaan u codeynaynaa caddadyada doolarka. Heerarka canshuuraha sannad kasta waxaa xisaabiya qiimeeyaha degmada bisha Janaayo kasta isagoo soo qaadanaya caddadka doolar ahaan ee caddadka canshuurta ee sannadka isagoo u qaybinaaya Qiimeyaasha Guud ee La Qiimeeyay (TAV) ee dhammaan hantiyada la canshuuri karo ee sannadkaas. Degmada waxay qiyaasaysaa koror ah 5% ah, oo la isku daray, ee TAV-ga ee mid kasta oo ka mid ah 4-ta sanno ee soo socota. Laakiin degmada waxay ku fashilantay in hantida tusaalaha ah ay kor uga kacdo heerkaas taasoo keenaysa qiimo hoose. Tani waa sababta heerarka canshuuraha mustaqbalka ee la qiyaasay aysan macno u lahayn waa in laga mamnuuco agabyada ololaha degmooyinka dugsiga.

Si aad u hesho falanqeynta kharash sax ah oo macquul ah, eeg webseedka SchoolDataProject.com.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Sida lagu xusay bayaanka taageeraya Soo jeedinta 2: “Gobolku ma daboolaayo kharashka lagu ilaalinayo deegaan waxbarasho oo ammaan ah oo caafimaad leh.” Arrintaani waa isla sheekadii Soo jeedinta 1. Ama gobolku si weyn oo ka hooseysa sidii loogu talagalay u maalgelinaysa, ama BSD ayaa si khaldan u maamulayso lacagaha, ama bayaanka “taageeridda” uu yahay buunbuunin mala-awaal ah, ama isku-dar dhammaan arrimahaas. Lacagaha canshuuraha, haddii si habboon loo maamulo, waxay faa’iido u yeelan karaan kobcinta ardayda, balse fadlan si cad noogu sheeg sababta baahiyaha aasaasiga ah ee waxbarashada ee Dastuurka Gobolka Washington uu waajibiyey ay si isa soo taraysa ugu tiirsan yihiin canshuurahaan loogu yeero “dib-u-cusbooneysiin” ee marin-habaabinta ah.